

Wargeyska Mountain View

Sateembar 6, 2017

**Qamiis, Sateembar 7.....Guddiga Bulshada Dugsiga (School Community Council),
3:30 p.m Maktabka Dugsiga**

**Jimco, Sateembaar 8.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha,
8:15 CLC Qolka 182**

Fariinta Agaasimaha

Waxaan rabaa in aan u mahad celiyo dhamaan waalidiinta iyo ilaaliyeyaasha yimid Habeenka-Ku-Soo-Noqoshada Dugsiga Arbacadii la soo dhaafay. Kuwa yimid waxay ogaadeen waxa caruurtooda baran doonaan sannadkaan, waxa laga filaayo fasalka iyo dugsiga oo idil, iyo siyaabaha dugsiga iyo waalidiinta u xariiri karaan una wada shaqeyn karaan si caruurta loogu kaalmeeyo waxbarashada. Haddii aadan tagi karin munaasabadda, aadna weli xiiso u qabtid macluumaadka, waxaa laguugu soo dhaweynaa in aad ballan ka qabsatid macalinka cunugaada.

Quraacda Fasalka

Waxaan ku faraxsanahay in aan quraac siino arday kasta oo ka tirsan dugsigena. Subax kasta, dhamaan ardayda Mountain View waxaa la siiyaa quraac lacag la'aan ah. Ardayda waxay soo galaan safka gymka laga bilaabo 7:40. Marka la gaaro 7:55, ardayda waxay socod ku maraan makhaayadda qaxwada, waxay soo qaataan raashinkooda, kaddibna waxay u gudbaan fasalka. Marka ay tahay 8:10, ardayda waxaa loo qaadan doonaa in ay soo daaheen, waa waqtiga la xeri doono makhaayadda.

Waxaan rabnaa in ardayda barato madax banaanida iyo mas'uuliyadda. Sidaas darteed, waxaan waalidiinta iyo qof kasta, aan ahayn arday, ka codsaneynaa in uu ku sugo saabaadka inta ardayda ku jiraan makhaayadda. Waad ku mahadsan tahay in aad sugtid inta caruurtaada ka qaataan quraacdooda.

Doorashada Guddiga Bulshada Dugsiga

Waxaan weli raadinaa hal qof dheeraad ah oo diyaar u ah in uu ka shaqeeyo guddiga. Haddii aad xiiso u qabtid, fadlan la xariir xafiiska shaqaalaha ama Mr. Limb.

Guddiga Bulshada Dugsiga wuxuu kaalmo ka geystaa gaarista go'aanka ku saabsan sida wanaagsan ee loo adeegsado miisaaniyadda dugsiga, sida loo soo saaro qorshooyinka horumarinta aqoonta, iyo waxay kaalmo ka geystaan ka wada hadalka iyo gaarista go'aanada brograamyada dugsigena. Guddiga wuxuu kulmaa hal mar bil kasta. Shirkena kowaad guddiga waxaa la qaban doonaa Qamiis, Sateembar 7, marka ay tahay 3:30 p.m. waxaana lagu qaban doonaa gudaha maktabka.

In Badan Ku Socda Afar (Walk More in Four)

Si ay ardayda iyo qoysaska loogu dhiirigeliyo in ay socod, baskiil, ama mooto ku tagaan dugsiga, waxaan ka qeybgeli doonaa hawsha ay mas'uulka ka tahay Waaxda Gaadiidka Utah (Waaxda Gaadiidka Utah), ee lagu magacaabo In Badan Ku Socda Afar (Walk More in Four). Arday kasta wuxuu imaan doonaa guriga isaga oo watta warqad oo ku kaalmeyaa in uu ogaado maalmaha uu dugsiga ku tago socod, baskiil, ama mooto. Dhamaadka afar todobaad, ardayda waxay warqadahaan ku soo celin doonaan macalimiintooda. Waxaan dhamaan warqadaha la socoshada oo dhamaystiran u diri doonaa Waaxda Gaadiidka Utah (Utah Department of Transportation), halkaas oo lagu qaban doono baqtiyaanasiibka. Kuwa ku guuleysto baqtiyaanasiibka waxay ku guuleysan doonaan waxyaabo sida dhalooyinka biyaha, koofiyadaha baskiilka, iyo xattaa baskiilo! Waxaan rajeyneynaa in aad ka soo qeybgeli doontid, iyo in aad socon doontid in badan ilaa inta suurtoogalka ah. Haddii aad daggan tahay meel ka fog dugsiga, waxaad cunugaada ku dajin kartaa meel u dhaw, ay ka lugeyn karaan.